Shaqadaydii hore iguma aysan bixin: Qaan-sheegashada lacag shaqada

My Old Job Owes Me Money: Wage Claims

Hadii aad shaqo ka tagtay ama ay kaa dhamaatay aana lagu siin dhamaan wixii lacag ah ee aad shaqaysatay waxa aad sheegan u kartaa "Qaan lacagta shaqada ah" qoladii aad u shaqeyn jirtay. Waxaad xaq u yeelan kartaa dhamaan lacagtii aad kasbatay ka hor intii aadan shaqada joojin xataa hadii shaqada lagaa eryey. Waxaa dhici karta in aad u hesho lacag kale ganaax ahaan hadii qolad shaqadu ay u hogaansami waayaan sharciga ku saabsan xaq-siinta shaqaalaha ka dib kolka ay shaqada joojiyaan.

Sharciga shaqada ee Minnesota waxa uu leeyahay talaabooyin la raaco si loo sameeyo qaan-sheegadka lacagta shaqada. Hadii aad tahay qof madax banaan oo is-kii u shaqeysa ama qordaraas qoraal ah aad haysato oo shaqada ku saabsan, waxaa dhici karta in sharciyada arrintaasi ay ka duwanaan karaan kuwa shaqaalaha caadiga ah. Akhri buuga ay ku qoran yihiin xeerarka maamula xaquuqda shaqaalaha. Dhamaan xeerarka ama qandaraasyada qolada shaqadu sameeysataa ma wada aha sharci, sidaa awgeed, hadii aad su'aalo qabto wac qareen. Warqadan war-gelinta ah waxa ku taal waxaa loogu tala galay shaqaalaha ee looguma tala galin qandaraaslayaasha.

Ka eeg waraqadayada war-gelinta ee shabakada *Job Status and Your Rights* hadii aadan hubin.

Goormay tahay in ay xaqayga i siiyaan?

- Hadii shaqada **lagaa eryey ama ay kaa dhamaatay,** sharciga Minnesota wuxuu leeyahay waa in lacagtaada lagu siiyo 24 saac gudahood ka dib kolka aad codsato.

- Hadii **a**digu iskaa shaqada aad uga tagtay ama **aad is casishay,** waa in lacagtaa lagu siiyaa marka xigta kolkaa ee lacagta la qaadanayo hadii aysan mudaddaa 5 cisho ka yar aysan ka dhimanayn. Kolkaa waa inaad sugtaa marka labaad ee lacagta la qaadanayo. Waa **khasab** in lacagtaa lagu siiyo 20 cisho gudahood.

Lacagta waa in lagugu siiyo meesha inta badan jeega lagugu siin jiray hadii aadan adigu codsan in boostada laguu soo dhigo jeega.

Waxaa jira waxyaabo sharcigu reebo:

- Hadii aad tahay xoogsade, waa in lacagtaada lagu siiyaa 5 hadii aad shaqada is-kaa uga tagto, hadii shaqada lagaa eryey ama ay kaa dhamaatay, xeerarkoodu waxa ay la mid yihiin kuwa kore - waa in ay lacagtaada kugu siiyaan 24 saac ka dib kolka aad codsato.

- Hadii aad ka tirsan tahay urur shaqaale (union) oo heshiis wadareed la galay qolada shaqada, waxaa dhici karta inaad leedihiin xeerarka kale oo ka duwan kuwa dadka kale.

- Hadii qolada aad u shaqaysaa ay musalifto ka hor inta aan lacagtaada lagu siin, oo ay maxkamad tagaan oo xareystaan musalid (bankruptcy), ka xareyso qaantaada iska maxkamadaa. Waxaa ka jira 4 maxkamadaha musalifida ah Minnesota waana ku dari kartaa magacaaga liiska dadka qaanta sheeganaya ee doonaya in lacagtooda la siiyo.

  Maxkamadaha musalifida inta badan qaamaha lacagta shaqaalaha ku saabsan waa ay ka hor mariyaan qaamaha kale. Taa macnaheedu waxaa weeye, waxaa dhici karta in lacagtaada lagu siiyo xataa hadii ay u eg tahay in qolada shaqadu aysan wax lacag ah heli karin. Hubi in qaantaadu tahay qaan la xiriirta lacagta shaqada!

- Hadii shaqadaadu ay ahayd in aad lacag ama hanti kale qabato, qolada shaqadu waxa ay ku qaadan kartaa ilaa 10 cisho ka dib maalintii ugu dambeysay ee aad shaqaysay in ay eegaan xisaabaadkii lagugu ogaa ka hor inta aan lacagtaada lagu siin.

Inta badan, qolada shaqada jeegaaga lacag ugama **goosan karto** alaab shaqo oo dhumtay ama la xaday ama burburtay awgeed. Waa ay yeeli **karaan** hadii iyadoo qoraal ah aad ogolaatay **ka dib** kolkii dhumida ama khasaarahu dhacay, ama hadii ay maxkamadu go'aamiso in aad adigu eeda leedahay.

Sidee ayaan u sheegtaa qaan-sheegadka lacagta shaqada

Wixii lacag shaqo ah ee aan lagu siin markii shaqadu kaa dhamaato durba sheego. Arrintan waxaa la yiraa sheegashada lacagta shaqada. **Sheegashadaasi waa in ay qoraal tahay**, laakiiin khasab ma aha in la sheego cadadka lacagta shaqada ah ee kaa maqan inta uu yahay.

Waxaa gadaal uga jira warqadan war-gelinta ah warqad tusmo ah oo muujinaysa sida loo sheegto qaamaha shaqada. Ku qor wixii aad rabto, ka dibna saxiix taariikhdana ku qor warqada. Koobi kala har. Waydiiso in qolada shaqadu ay ku siiso dhamaan wixii lacagta ah ee kaa maqan.



Ka waran hadii aysan lacagta markiiba i siin?

Waxaa loo tix gelin in lacagtaadii lagu siiyey maalinta jeega lagu siiyo ama maalinta boostada la soo dhigo, waa hadii ay jeega boostada kuugu soo dirayaan qolada shaqadu.

- Hadii lacagta aan lagugu siin *24 saac gudahood* ka dib kolka aad codsatay, waqtigii in lagu siiyo ay ahaydna la soo dhaafay (kor ka eeg - Goorma ayey tahay in ay Xaqqayga i Siiyaan?), sharci gobolka ayaa kuu ogol inaad qolada shaqada saarto ganaax ah maalin lacagteed maalin walba oo ay la daahaan bixinta xaqaaga. Ilaa iyo to 15 cisho ugu badnaan.

  Si aad u ogaato cadadka ganaaxa ah, marka hore soo ogow lacagta maalintii aad ku shaqayn jirtay. Si aad taa u sameeyso, u qaybi lacagta lagu siiyo inta maalmood ee aad markaa shaqaysay. Ka diba tiri inta maalmood ee qolada shaqadu ay kaala soo daahday lacagtaada. (ilaa iyo 15 cisho). Isku dhufo labadaa tiro si aad u hesho lacagta ganaaxa ah ee aad ku leedahay qolada shaqada.

Kani waa tusaale ku saabsan sida loo xisaabin karo lacagta ganaaxa ah:

Toni waxaa shaqada laga eryey Juun 10 keedii. Maadaama shaqada laga eryey, qolada shaqada waxaa laga rabay inay jeegeeda boostada u dhigaan 24 saacadood gudahood ka dib kolkii ay codsatay lacagteeda in la siiyo. Waxa ay shaqeyn jirtay 5 maalmood asbuuciiba waxaana lacagta la siin jiray 2dii asbuucba hal mar. Lacagta ay caadiyan qaadan jirtay waxa ay ahayd $875.00. Waxa ay codsatay in lacagtii shaqada la siiyo Juun 12 keeda. Hase yeeshee qolada shaqadu waxa ay boostada u soo dhigtay jeegeedi Juun 20 keeda.

→ Si loo xisaabiyo ganaaxa, waxaad u baahan tahay in aad ogaato Toni's maalintii cel-celis ahaan inta ay ku shaqayn jirtay. Marka ugu horeeysa waxa aad u baahan tahay in aad xisaabiso meeqa maalmood ayaa ku jira labada asbuuc ee Toni lacagta lagu siin jiray.

5 Maalmood oo shaqo ah x **2** asbuuc oo lacagta lagu qaato **=**
10 cisho labadii asbuuc ee lacag qaadadka.

→ Marka xigta, waxa aad xisaabin Toni's maalintii inta ay ku shaqeyn jirtay adigoo u qaybinaya lacagta jeegeeda inta cisho ee ay mudaddaa labada asbuuc ah shaqeysay:

$875.00 ÷ 10 = $87.50. Kolkaa Toni's maalintii waxa ay ku shaqeyn jiray $87.50.

→ Ka dib si aad u xisaabiso inta maalmood ee ay ku qaadatay qolada shaqadu inay lacagteeda siiyaan

Juun 20 (maalinta lacagta la qaato) – Juun 13 (maalinta lacagta la codsaday ugu dambeyn in la bixiyo) = 7 maalmood

Ganaaxu waa:

$87.50 (maalintii inta lagu shaqeyn jiray) x **7** (inta cisho ee lala soo daahay) = **$612.50**

- Qolyaha loo shaqeeyo intooda badani lacagta shaqada waxa ay ku bixiyaan waqtiga loogu tala galay in la bixiyo. Hadii aysan qoladaadu saa sameyn, waxaa laga yaabaa in aad u baahato in aad dacawayso. Dacwadaas oo ku saabsan labadaba lacagta shaqada ee aad ku leedahay iyo ganaaxa ku saabsan in aysan lacagtaada waqtigii la rabay kugu siin.

  Hadii lacagta shaqada iyo ganaaxu ay yihiin $15,000 ama wax ka yar, waxa aad ka dacaweyn kartaa qolada shaqada maxkamada dhex-dhexaadinta. Qareen uma baahnid. Hadii lacagtu ay ka badan tahay $15,000, waa in aad qareen heshid waayo waxaad u baahan tahay in aad dacwadaada ka xareynso Maxkamada Degmada.

- Hadii qolada shaqadu ay kuu soo bandhigaan baaq waan-waan ah oo ku saaban xaqa aad u haysto, ka tasho arrintaa inta aadan maxkamad aadan oo aysan maxkamadi go'aamin in qolada shaqadu bixiso kaliya wixii ay kuugu baaqeen ama ka yar, waxaa dhici karta inaad bixiso kharashka maxkamada ka gala qolada shaqada. laakiin, hadii ay go'aansadaan in aad hesho xaq ka badan wixii ay kuu ogolaayeen qolada shaqadu, qolada shaqadu waxaa dhici karta in ay bixiyaan kharashka kaaga baxa maxkamada.

Goorma weeye waqtiga aan dacaweyn karaa shaqada?

Waa in aad wixii dacwo ah ku sameeysaa **2 sanno gudahood** laga bilaabo maalinta lacagtaada aan lagu siin. Maalintaasi waxaa dhici karta in ay tahay maalintii shaqada kuugu dambeeysay, ama ka hor, hadii aan wax lacag ah aadan qaadan muddo ka hor inta aadan shaqada joojin. Mudada sharcigu ogol yahay in aad dacwada ku soo xareysataa waa 2 sanno gudahood laga bilaabo maalinta jeeg kasta loogu tala galay in aad qaadato. Dacwadaada u bilow sida si ugu dhaqsaha badan si aysan kaaga dhumid wixii cadaymo ama maqraatiyaal ah ee haysato.

Wixii akhbaar ah ee ku saabsan sharciyada Minnesota ee sheegashada lacagta shaqada, saacadaha siyaadada ah, iyo u isticmaalka ilmaha shaqaale ahaan, ka wac Wasaaradda Shaqada iyo Warshadaha ee Minnesota (Minnesota Department of Labor and Industry) ee telefoonkeedu yahay (651) 284-5005 ama 1-(800) 342-5354 ama gal khadka (on-line) www.dli.mn.gov.

Warqadaha xogtu waa xog sharci ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto. *Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.*

© 2020 Minnesota Legal Services Coalition. **Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixi aan ahayn ganacsi sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro. In loo koobiyeeyo, ama loo istimaalo arimo ganacsi waa mamnuuc.**

Kuwani waa tusaaleyaal ah warqadaha la qoro kolka la codsanayo lacagta shaqada. Waa muhiim, inaad koobi kala harto warqada saxiixan ee aad dirto. Sidoo kale waa ay fiican tahay in warqada aad ku dirayso boostada aad ku dirto nooca la yiraa boostada sugan ama aad ka codsato boostada inay sugaan in warqadaa la geeyey meeshii loogu tala galay in la geeyo. Si kolkaa aad u haysato cadeyn ah in la diray, meesha loo diray iyo maalinta la diray.

Date: _____
Taariikhda

_____

_____

_____
(Halkan ku qor magaca qolada shaqada iyo ciwaankooda)

Re: Wage Demand, Request for Employment File and Reason for Termination
Tix: Waydiisasho lacag shaqo, Codsi Galka Shaqada iyo Sababta Shaqo ka Eryida

Dear (Employer's name):
(Magaca Qolada Shaqada) Qaaliga ahow:

Please send me a copy of my complete employment file as well as the reason for my termination. Additionally, I am requesting all outstanding wages due and owing pursuant to Minnesota law to be sent to me within 24 hours from this demand. If I do not receive my wages, I will pursue all statutory penalties available for nonpayment of wages.

Fadlan iiga soo dir koobi buuxa galkayga shaqada iyo sababta shaqada la iiga eryey. Intaa waxaa dheer, waxaan codsanayaa dhamaan wixii lacag ah ee aan shaqeystay ee aan xaq u leeyahay sida uu qabo sharciga Minnesota in la iigu soo diro 24 saac gudahood. Hadii aanan helin lagactii shaqadayda, waxa aan raadsan doonaa dhamaan wixii sharciyan aan xaq u leeyahay ee ganaaxa ah ee aan heli karo waayo lacagtii shaqada la ima siin waqtigii sharcigu qabay in la igu siiyo.

Please send the requested information and wages to me at the following address:
Fadlan ku soo dir akhbaarta la codsaday iyo lacagta aan shaqeystay ciwaankan soo socda:

_____

_____

_____
(clearly print your name and address) (Si cad halkan magacaaga iyo ciwaankaagaba ugu qor)

Sincerely,
Mahadsanid,

_____
(Your signature) (Saxiixaaga)